JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

# HALGANKA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED



JAMHUURIYADDA DEMOQRAADIGA
SOOMAALIYA

# HALGANKA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED

Waxa soo saaray X. Guud ee Ururrada
Shaqaalaha Soomaaliyeed.

PJ 2534 .X57 H35 1978

MUQDISHO 1. 5. 78

RSCH
1159857



**Jaalle Maxemed Siyaad Barre Xoghayaha Guud ee XHKS, Madaxweynaha JDS oo furaya Shir-weynihii 1aad ee Aasaaska X. ururada shaqaalaha Soomaaliyeed**



Jaalle Maxamuud Cali Axmed, Guddoomiyaha xiriirka Guud ee Ururada Shaqaalaha Soomaaliyeed kana tirsan Golaha dhexe ee XHKS oo ka hadlaya shirkii 1aad ee tacabkordhinta.

# ARAR

Iyada oo Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed uu sanad jirsaday, kuna howlanaa muddadaa sidii uu dhidibada ugu aasi lahaa dhismihiisa guud, ugana hirgalin lahaa goobaha shaqada, Gobollada iyo Degmooyinka dalka, ayuu hadad-awood u helay, in uu u soo bandhigo buuggan yar oo akhristayaasha ka siin kara musawir fiican halgankii shaqaalaha Soomaaliyeed dhinaca taariikhda, abaabulka, qaabka dhismaha X.U.S.S. iyo Xiriirka uu la leeyahay Ururrada Shaqaalaha ee Adduunka.

Waxaa hubaal ah in Shaqaalaha Soomaaliyeed oo ku hubeysan aragtida hantiwadaagga Cilmiga ah (Maarkisim-Leninisim), kana shidaal qaadanaya Barnaamijka iyo Xeerka XHKS, ee uu hoggaaminayo halyeyga Kacaanka, Jaalle Maxamed Siyaad Barre, isbaheysi iyo wax wada qabsina la leh Shaqaalaha Adduunka, ay gaari doonaan himilooyinkooda dhaadheer ee ah hirgelinta dhismaha Hantiwadaagga Cilmiga ah, iyo tirtiridda isku dulnoolaadka iyo kadeedka.

Ugu dambeysta, waxaan akhristayaasha ugu hambalyeynayaa in ay buuggan ka heli doonaan xog wanaagsan oo la xiriirta halganka Shaqaalaha Soomaaliyeed, waxaana aan rajeynayaa in uu anfici doono, bilow fiicanna u noqon karo qorista taariikhda halganka Shaqaalaha Soomaaliyeed.

**Jaalle Maxamuud Cali Axmed**

Guddoomiyaha Xiriirka Guud

ee Shaqaalaha Soomaaliyeed

# KAALINTA SHAQAALUHU KAGA JIRO TAARIKHDA AADAMIGA

Mar lix (6) ilaa thoboda (7) kun sano laga joogo intii ka horraysay, aadamigu sida dugaaguu u noolaa.

Dadka reer-reer aan kiiba tobaneeye qof ka badnayn ayuu isula noolaa, waxayna nafaqaysan jireen miraha iyo xididdada geedaha. kaddib dadku qalabuu samaystay uu ku ugaarsado, madag lagala baxaa waa bartay halkaasna nolosha aadamigu tan duguugga way ka duwanaatay.

Berigaa hanti gaari ma iirin, waa la wada shaqayn jiray wixii la helaana waa la wada cuni jirey, tacabkoo waqtigaa yaraana kayd kama hari karin.

Miragurashadii iyo ugaarsashadii kaddib waxaa la gaaray in xoolo la dhaqdo dabadeedna beero la fasho ilaa la gaaro in makiinado quwad dabiici ah ku socda la samaysto.

Heerarkaa kala duwan aadamigoo idil isku mar ma wada gaarin ee waa loo kala horeeyey, waqti dheerna waa qaadatay.

Bulshadii heer ka gudubtaa, tii heerkii hore taagan way ku nolol wanaagsanaataa, ka awood roonaataa, ka

na garaad sarraysaa, Marka waxaa billaabmay in qaar cayrtoobay kuwa kale gun u noqdeen kuwa dagaal looga adkaadayna la gumeysto oo lagu shaqaysto.

Waxaa billaabmay kolka bulsho dabaqaad ku nool, habka dhaqan-dhaqaale ee hanti-gocsadkana maanta ugu sarreeya.

Berigaa wixii ka dabmeeyey aadamigu halgan dabaqadeed ayuu ku iiraa. Bulsha kastana halgankeeda dabaqadeed shaqaalaha ugu horeeya, maxaa yeelay dabaqadda bulsho aan dabaqad lahayn kaalin kasta oo hawl iyohanti-wadaag ku dhisan, waa shaqaalaha.

Shaqaaluhu caddaalad darrida iyo dhiig miiradka lagu hayo ayuu ka dagaallamaa bulshadana ka ilaaliyaa.

Waa dabaqadda ugu kacaansan waayo hantileyaashu waa dhiig miirad, iskooda u shaqaysyeyaashu waa ladan yihiin oo isbeddel ma rabaan, beeraleydu waa laba nafoodley oo hantidana waa jecel yihiin waana shaqeeyaan, shaqaaluhuse ma noolaanayaan hadayn aroor walba Kalihin Hantilaha loo shaqeeyo si uu faa'iidada u badsasho, hawlo badan ayuu abaabulaa markaana shaqaaluhu waa bataan.

Dabadeed waxay arkaan in ay yihiin kuwii wax walba tacbaayay, ugu hawl badnaa bulshada uguna nolol

litay, markaasay dagaal ku qaadaan cadawgooda addoonsanayay.

Dagaalladaa waa ku citibaar qaataan garaadkooda siyaasiga ahina waa ku kordhaa, waxayna ogaadaan, sida Marx (Markis) iyo Engels yiraahdeen, in aan «wax ka dhacaaya jirin silsiladaha addoonsiga moyee. Adduunkeyna hantinaayaan».

Sidaa ayaa tariikhiyan shaqaalaha xil gaar ah loo saaray oo loo ogaaday in ay yihiin kuwa had iyo jeer horukac iyo sinnaan u horseeda bulshada.

Halgankooda kacaameed shaqaaluhu waxay la kaashadaan ganacsatada, yar-yar, beeraleyda yar-yar iyo indheergaratada horusocodka ah oo wadanninimo iyo wayo-aragnimo ku dheehan tahay.

Halganka kacaameedna mid dhammaada ma aha oo marna waxaa lagula jiraa dabaqadaha dibusocodka ah ee bulshada marna dabiicadda oo horukac maadi ah iyo maskax ayaa la tiigsan hayaa.

**TAARIIKHDA HALGANKA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED.**

Taarikhda halganka Shaqaalaha Soomaaliyeed waa gabal ka mid ah dhaqdhaqaaqa Kacaaneed ee Adduunweynaha, wuxuuna ku abtirsadaa dhaqdhaqaaqa xoogsatada dalalka so koraya ee mudada dheer halganka qaraar kaga soo horjeeday gumeysiga iyo Imperialiyadda Caalamiga ah, una halgamayey xorriyadooda, Cadaaladda iyo Dhismaha Bulsho barwaaqeysan.

Gumeysiga ka hor dadka Soomaaliyeed waxaa intooda badani ka xoogsan jiratay xirfadda xoolaha dhaqashada, inta kalena waxay ahaayeen Beeraley, Kalluumeysato, Ganacsato iyo dad yar oo ka shaqeyn jiray xirfado gacanta laga qabto. guud ahaan dhaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu ahaa mid bilow ah dadkuna wuxuu u badnaa iskood u shaqaystayaal, sidaas awgeed xiriirka wax soo saarku wuxuu ahaa mid aan lahayn isku noolaasho wayn.

XILLIGII GUMEYSIGA

Markii uu Gumeysigu dalka Soomaaliya soo galay wuxuu bilaabay inuu u gogol xaaro dhismaha Habka Hanti goosgia oo ka dhima dalka Soomaalia si uu uga faa'iideysto khayraadka maadiga ah ee dalka cududda shashaqeysana u dhiig miirto ayuu:

1) Wuxuu la wareegay ilihii waa waynaa ee gancsiga, cashuurana waa soo saaray.

2) Wuxuu albaabada u furay shirkado Hantigoogoosi oodalka soo gala.

3) Wuxuu dhiiri geliyey inay dadka dool ku yimaadaan dad shisheeya ah,

daan dad shisheeya ah, degaanna dhulka saldhigga u ah khayraadka dalka. gaar ahaan waxaa arrintaas ku kici jiray gumeysigii Talyaaniga oo qabsaday dalka qaybtiisa Koonfureed, taasoo u sahashay dad badan iney dalka yimaadaan khasabna ku qabsadaan dhulka ku yaal wabiyada jiinkooda ee wax beerashada ku fiican, waxaana laga beeri jiray miro loogu tala galay ganacsi dibadeed Muuska.

4) Wuxuu Talyaanigu bilaabay inuu dhiso wershado yaryar ee u adeega danaha dhiigmiiradka hantigoosiga sida wershadda Sonkorta ee SAIS kuwaasoo shaqaalaha ka shaqeeya shaqada lagu khasbi jiray cadaadis iyo dhibaaooyin waa wayn lagu hayey, wax xaquuq ah oo haba yaraatee loo ogolaana ayan jirin.

5— Waxaa abuurmay shaqaale ka hoos shaqeyn jiray maamulkii gumeystayaashii Taliyaaniga iyo Ingiriiska

sida askartii, saraakiishii, dad xafiisyada ka shaqeeyo iyo kuwii dhismaha.

Halkaas waxaa ka abuurmay dabaqaad shaqaale oo dadweynaha Soomaaliyeed la qabtay cadaadiskii gumeysiga dhiigmiiradku hantigoosiguna ku hayey dhibaatooyin dheeraad ah, sidaas awgeed ayagoo shaqaaluhu ka gilgishay dhibaatooyinkii gumeysiga foosha xun ayey bilaabeen shaqo ka joogsi banaan baxyo iyo wax kasta oo ku muujin karaan diidanaa shada dhibaatooyinkaas. Iyadoo uu shaqaalaha Soomaaliyeed uu sameeyey natijadii ka soo baxday dagaalkii 2aad dunida iyo curashadii beesha Hantiwadaagga ah iyo xoogeysigii dhaq dhaqaaqa gobanimadoonka ah dalka Soomaaliyeedna uu ka abuuray Xisbigii S.Y.L. ee u horseedayey gobanimadoonka ayaa halgankii shaqaaluhu xoogeystay waxaana bishii Dismbar 1949kii si rasmi ah loo dhisay Urur Shaqaale ee Soomaaliyeed. Waxaana laga furay qaybtii Koonfureed ee Talyaanigu markii hore gumeysan jiray. Ujeeddooyinka ururkaas waxaa qayb wayn ka qaadanayey arrimaha la xiriira gobanimadoonka, gaar ahaan Mabaadiidii Xisbigii S.Y.L.

Bishii Maajo 1955 waxaa la dhisay Urur Guud ee kulmiya Shaqaalaha Soomaaliyeed ee shaqooyinka kala duwan wuxuuna la magac baxay Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed. Markaas ka dib waxaa kor u kacay garaadkii siyaasiga ee Shaqaalaha waxaana abuurmay ururro kala duwan ee shaqaalaha taas oo keentay in la ogaado baahida loo qabo in la mideeyo dhaqdhaqaaqa ururrada

Shaqaalaha Soomaaliyeed ee kala duwan, sidaas awgeed ayaa bishii Nofembar 1959kii la dhisay urur guud ee mideeya ururradii shaqaalaha ee wakhtigaas jiray gaah haan kuwii raacsanaa Xisbiii S.Y.L. waxaana loo bixiyey xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed. (C.S.L.)

## XILLIGII MUSUQ MAASUQA:

Markii la gaaray gobannimadii 1960 ee uu xisbigu S.Y.L. ee u horseedaayey gobannimada taliskiisii gacanta u galay koox daneystayaal ah ee ugu adeegtay awoodda xisbiga danahooda gaarka ah iyo kuwa gumeysiga cusub ayaa hogaamiyeyaashii ururrada shaqaalaha qaarkood, waxay noqdeen daneystayaal u adeega danaha hantiilayaasha iyo gumeysiga cusub, halkaasoo shaqaalihii ay ka mid ahaayeen Macallimiinta, Shaqaalaha Caafimaadka, Boostaha iyo kuwa kale ay ka gelgisheen taliskii qalleecnaa ayna ka soo horjeesteen waxayna sameysteen 1961dii Urur Shaqaale oo horusocod ah ee la magac baxay Xriiirka Guud ee Shaqaalaha Soomaaliyeed (G.C.S.L.) ururkaasi wuxuu halgan adag kala soo horjeestay dawladihii dib u socodka ahaa wuxuuna xoog saaray inuu kashifo siyaasaddii foosha xumed ee taliskaas, wuuxuuna qaban qaabin jiray bannaan baxyo iyo shaqa ka joogsi iyada oo taliskaasina isku deyi jiray inay si qaawan u curyaamiyaan hawlaha ururkaasi danaha Shaaalahana isu hortaagaan hadaladii taariikhda galay ee madaxdii xukuumadii wakhtigaasi raadiyaha ka jeediyeen iyagoo ka jawaabaya

shaqa ka fariisi Ururkaasu abaabulay waxaa ka mid ahaa:

«Haddii 10 sano aan Tacliin la baran, Haddii Boostaha Awr la raro, Haddii Cisbitaallada dadka 100-100 loo tubo ma aqoon saneyno shaqa ka joogsigaana».

Cadaadis aan xad lahayn ayaa ururkaas lagu sameyn jirey madaxdiisana jeylka ayaa loo taxaabi jiray. 1964 waxay Dawladdii go'aan ku gaartay iney si rasmi ah u xirto Ururkaasi, hase yeeshee amarkaasi xaaraanta ahi waa socon waawey Dawladdii wakhtigaas jirtayna waa u suurta geli weyday inay tirtirto ururkii guud ee shaqaalaha. Wakhti aan badnayn ka dib, wuxuu ururkii si rasmi ah u bilaabay hawlihiisii caadiga ahaa, waxaana ku soo biiray ururro kale taasoo keentay in xoogiisii sii adkaado arrintaasi waxay keentay in ururkii guud ee shaqaalaha Soomaaliyeed uu ku guuleysto inuu xubin ka noqdo ururka shaqaalaha adduunka (I.L.O.) sanadkii 1967. Taasoo ahayd guul weyn ee ururkaasi ka soo hooyey halgankii uu kula jiray xukuumadihii dib u socodka ahaa.

Arrintaasi waxay khasab kaga dhigtay dawladihii inay ururka la gasho heshiisyo ku saabsan Mushaharooyinka Shaqaalaha iyo Caymiska. Sannadkii 1968 bartamihiisii ayuu ururka shaqaaluhu uga digay dawladdii fulin la'aanta heshiiskii isaga ahaa hase yeeshee dhig loo ma dhigin. Oktoobar 1968dii ayuu ururkaasu qaban

qaabiyey shaqa ka joogsi wayn ee ay sameeyeen shaqaalihii Jamhuuriyadda oo idil.

Taasi waxay xukuumaddii ku noqotay dharbaaxo aan la qaadan karin waxayna ku dhaqaaqday tallaabooyin qallafsan oo xaq darro ah:-Madaxdii ururka iyo dhammaan shaqaalihii horusocodka ahaa waxaa laga dhigay wax la xiray, wax shaqadii laga saaray iyo wax tuulocyinka loo musaafuriyo, ururka hawlihiisiina waa la is hortaagay waxana lagu dhex beeray qabiil, danaysi iyo tafaraariqii dalka ka jira, taasoo keentay in hawlihii Ururku curyaamaan. Hase yeeshee halgankii shaqaaluhu soo galay waxaa lagala horay dhaxal fiican oo ay ka mid yihiin :-

1) Kartida Shaqaalaha iyo kaalintooda taariikhiga ah oo la ogaaday.

2) Shaqaalaweynaha oo ka helay halgankaas waa-ya aragnimo iyo bisayl siyaasadeed hubsadayna inuu burjuwaasiyadda ka adkaan karo haddii uu meel uga soo wada jeesto.

3) Halgankii shaqaaluhu wuxuu qaawiyey foolxumadii taliskii Musuq-maasuqa wuxuuna dhabbaha u xaaray kacaankii 21kii Oktoobar 1969kii ee ay sameeyeen Ciidammada qalabka sida iyagoo ka turjumaya rabidda Xoogastada Soomaaliyeed.

## XILLIGII KACAANKII 21ka OKTOOBAR 1969

Markii uu curtay kacaankii 21kii Oktoobar waxay shaqaaluhu sameeyeen bannaan baxa wayn oo ay ku muujiyeen xiisaha ay u hayeen is beddel kacaannimo waxayna safka hore ka galeen hirgelinta baaqii kacaanka ee ku qorraa xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee kacaanka taasoo keentay in hoggaankii kacaanka ee uu majaraha u hayey Jaalle Maxamed Siyaad Barre uu qaderin fiican siiyo dawrka shaqaalaha wuxuuna Jaalle Siyaad caddeeyey in shaqaaluhu yihiin laf dhabarka kacaanka.

## KAALINTII X.S.M.G.S.K. EE BARBAARINTA SHAQAALAHA.

Ugu horreyntiiba waxaa Xafiiskii Siyaasadda M.G.K. gaar ahaan laantiisa shaqaaluhu xil weyn iska saartay abaabulid. Iskudubbaridid, Hanuunin iyo hawlgelinta shaqaalaha Soomaaliyeed, waxaana xifiiskaasi diyaariyey boqollaal kaader oo dalka gudihiisa iyo dibaddiisa loogu soo tababaray hoggaaminta shaqaalaha. Taas oo loogu gogol xaaray dhismaha Urur Shaqaale oo Caafimaad qaba, mideeyana dhammaan shaqaalaha Soomaaliyeed, horseedna u noqda halganka shaqaalaha Soomaaliyeed ugu jiro dhismaha Hantiwadaagga Cilmiga. Waxaa kaloo Xafiiskaasi xil weyn iska saaray inuu u doodo danaha Shaqaalaha guula dhaxal gal ahna waa ka soo hooyiyey oo ay ka mid yihiin sameynta iyo sugidda sharciyada la

xiriira daryeelka arrimaha shaqada iyo shaqaalaha ee taliska kacaanku si is dabajoog ah u soo saarayo. Waxaa kaloo xusid mudan sidii habsamida ahayd ee Xafiiskii S.M.G.S.K. uga tarjumay una dhaqan geliyey himilada shaqaalaha Soomaaliyeed ee la xiriirta is bahaysiga iyo wax wada qabsiga uu la leeyahay shaqaalaha horusocodka ah ee adduunka, taasoo keentay in shaaalaha Soomaaliyeed xubin firfircoon ka noqda dhammaan Ururrada Shaqaalaha Adduunka ee horusocodka ah qaddarin iyo tixgelin fiican ku yeesho.

**TLALLAABOOY/NKI/ KCAAANKII 21kii OKOTOOBAR UU KA QAADAY DARYEELKA DANHAA SHAQAALLAHA.**

Waxaa la wada ogsoonyahay in Kacaankii 21kii Oktoobar markii uu curtay uu bilaabay inuu si is daba joog ah u qaado tallaabooyin lagu daryeelayo danaha dadweynaha guud ahaan, gaar -ahaan shaqaalaha Soomaaliyeed waxayna ka xusi karnaa.

1) 7dii Maajo 1970kii waxaa gacanta dadweynaha lagu soo celiyey dhammaan Bangiyadii, Wershedihii, iyo Ilihii kale ee dhaqaalaha ee shisheeyuhu gacanta ku hayeen Hantigoosiguna Shaqaalaha ku dhiig miiran jiray.

2) Isla sannadkaa 1970kii waxaa si caddaan ah markii ugu horreeyey shaqaalaha Soomaaliyeed loo oggo-

laaday inay si bareer ah u xusaan maalinta shaqaalaha adduunka ee 1da Maajo iyadoo weliba loo aqoonsaday inay tahay Ciid qaran.

3) 21kii Oktoobar 1970kii waxaa soo baxday xaashidii 2aad ee kacaanka ee lagu caddeeyey in dalka Soomaaliya ku dhaqmaayo habka Hantiwadaag Cilmiga ah taasoo shaqaalaha u ahayd guul wayn yididiiladiisa iyo himilooyinkiisana waa cusub u furtay.

4) Luulyo 1970kii waxaa laaasaasay Wasaaradda Shaqada iyo Isbocrtiga oo laga xilsaaray horumarinta arrimaha la xiriira shaqada iyo shqaalaha.

5) Dejintii sharcigii shaqada ee soo baxay 25kii Maajo 1972dii.

6) Dhismihii Guddiyada Shaqaalaha 24kii Luulyo 1973kii.

7) Sharcigii ama Xeerkii joogtada ka dhigaay Shaqaalihii dawladda ee aan joogtada ahayn ee soo baxa 2dii Maarso 1972dii.

8) Sharcigii Caymiska Shaqaalaha ee soo baxay Disheembar 1972dii.

9) Xeerkii Lam. 50 ee soo baxay 1972dii ee lagu

abuuray Dawladaha Hoose Gobollada iyo Degmooyinka. Shaqaaluhuna qayb wayn ku yeeshay Maamulka Hawlaha Dawladaha iyo Dadweynaha ee ka socda Gobollada iyo Degmooyinka.

10) Arrinta ugu muhiimsan waxay ahayd in ugu dambeystii uu si rasmi ah u Dhismay Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed 1da Maajo 1977dii, kaasoo ah urur hor u socod ah oo madax bannaan shaqaalaha Soomaaliyeedna mideeyey kuna dhisan Madda'a Demoqraadiyad ah Guddoonka Dhexe una halgamaya Dhismaha Hantiwadaagga Cilmiga ah, isagoo tixgelinaya waayaha iyo duruufta gaarka ah ee dalka qorshe cadna u sameystay u jeedooyinka dhaadheer iyo kuwa gaagaaban ee Shaqaalaha Soomaaliyeed, qorshahaas oo lagu caddeeyey Barnaamijka iyo Xeerka X.G.U. SH. S. ee ka shidaal qaadanayo Barnaamijka iyo go'aannada Xisbiga K.H.S. waxaana lama huraan ah ama hubaalna ah in midnimada shaqaalaha Soomaaliyeed ee ku hubeysan aragtida Cilmiga ah ee Hantiwadaagu ay guulo dhaxal gal ah ka soo hooyeyso halgankooda kacaannimo iyagoo bahaysanaya xoogagga kale e horusocodka ah ee dalka gudihiisa iyo dibaddiisa waxaana la hubaa in halgankaasu ku dambayn doono guul iyo barwaaqo.

**DHISMAHA IYO WAAJIBAADKA XIRIIRKA GUUD EE URURRADA SHAQAALAHA SOOMAALIYEED.**

Urur kasta oo leh ujeeddooyin cad cad oo uu higsanaaya, si uu ugu guuleysto halgankiisa waxaa lama huraan ah in uu is abaabulo, yeeshana barnaamij shaqo ee uu ku qeexo waajibaadka iyo xilka taariikh ahaaneed ee la gudboon marxalad kasta ee uu marayo iyo Xeer uu ku caddeeynayo qaabka dhismahiisa iyo tabta xilgudashada. Arrimahaas oo dhammaantood isugu soo biyo shubanayo: adkeynta dhismaha ururka, tilmaamidda ujeeddooyinkiisa, qorshaynta xilkiisa taariikh ahaaneed iyo caddaynta habka hawl qabadka xubnihiisa. Sidaas awgeed ayaa shirweynihii Aasaaskii Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha ee lagu qabtay Xamar, 27-30-4-77, waxaa lagu dhisay Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed, waxaana Shirweynahaas lagu Guddoonsaday barnaamij iyo Xeer uu leeyahay Ururka, laguna tifaftiray isbeddelka Kacaaneed ee maanta dunida ka socda guud ahaan, gaar ahaanna dalka Soomaaliya, iyo kaalinta Shaqaalaha Soomaaliyeed ka qdaaanayo isbeddelkaas saameeya horumarka dhaqaale, siyaaso, iyo bulsho ee maanta Dalka ka socda. Waxaana Shriweynahaas lagu doortay Guddiga Dhexe ee Xiriirka guud iyo Baarista iyo Kormeerka ee X.G.U.SH. S. iyadoo shirweynahaas loogu gogol xaaray Shirar iyo kulammo lagu qabtay dhammaan goobaha shaqada, Gobolla-



**Sawirkani wuxuu muujinayaa martidii ka soo qayb gashay Shirkii aasaaska xiriirka Guud ee Ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed ee la qabtay bishii Abriille 1977dii, kana yimid ururrada Shaqaalaha aannu saaxiibka nahay.**



**Waa Ergooyinkii Shirweynihii aasaaska ka soo qayb galay oo dhageysanaya khudbaddii Xoghayaha guud ee XHKS.**

da iyo Degmooyinka, shaqaaluhuna ku soo doortay guddiyadoodii hoggaaminta.

## QAAKBA DIHSMAHA XIRIIRKA GUUD EE U.SH. SOOMAALIYEED

Haddii aan u gundadegno qaabka dhismaha ee Xiriirka Guud, waxaynu arkaynaa in uu ku dhisan yahay, kuna dhaqmo mabda'a dimuqraadiyadda guddoonka dhexe kaasoo micnahiisu yahay in:-

1. Dhammaan guddiyada hoggaaminta la doortay (Min hoos ilaa kor)
2. Go'aan ka gaaridda arrimaha oo loo wada jiro.
3. Tira yar oo u hoggaansata inta badan.
4. Guddiyada hoose oo toos u fuliya go'aannada iyo awaamirta guddiyada sare, iyada oo ay ka dhaxayso guddiyada kala sarreeya war kala helid iyo xisaabtan joogto ah ee lagu horumarinayo habsami u socodsiinta hawlaha adkeynta anshaxa iyo dhisibiliinka Ururka, isagoo ku habaysan laba qaab oo kala ah:-

b) Qaabka wax soo saarideed.
t) Qaab degaan.


Qaabka wax soo saaridda waxaa ilaa hadda ku dhisan

lix Urur Shaqaale oo heer qaran ah, iyadoo Urur kasta la isugu geeyey shaqaale dabeecadda shaqadoodu isku dhawdahay, waxayna kala yihiin :

### b) URURKA WARSHADAHA :

Ururka Warshadaha, waxaa ururkan xubno ka ah shaqaalaha ka shaqeeya hay'adaha hoos ku qoran:-

1. Wasaaradda Warshadaha.
2. Warshadda Hargaha iyo Saamaha.
3. Warshadda Hargaha iyo Kabaha iyo Soomaaliyeed.
4. Warshadda Sigaarka iyo Tarraqa.
5. Warshadda Sobral
6. Warshadda Saliidda
7. Warshadda Birta Shubta
8. Warshadda Caanaha
9. Warshadda K. Koollada
10. Warshadda Burka iyo Baastada
11. Warshadda Alba Ziini
12. Warshadda Saabuunta Bayl
13. Warshadda Marmarka Sameysa
14. Warshadda Nacnaca



**Shaqadii Shirweynihii aasaaska Xiriirka Guud ee Shaqaalaha oo ka socota Akedeemiyada Jaalle Siyaad.**



**Waa Ergooyinkii Gobollada uga qayb galay shirweynihii aasaaska oo Goboladoodii u laabanaya.**

15. Warshadda Magdeynta Munasar

16. Warshadda Ifka Tox

17. Warshadda Rinjiga

Ururka waxaa lagu dhisay Shirkii Abriile 77dii ee lagu qabtay Warshadda T. iyo Sigaarka waxaana shirkaas lagu doortay Guddiga Dhexe ee Ururka oo ka kooban 32 xubnood iyo Guddiga Fulinta oo ka kooban 5 xubnood.

## T) URURKA BEERAHA, XOOLAHA, IYO MACDANTA

Waxaa ururkaas ku jira shaqaalaha ka shaqeeya hay'adaha soo socda:-

1. Wasaaradda X. X. Dh. iyo Daaqa.
2. Wasaaradda Macdanta.
3. Wasaaradda Beeraha.
4. Wakaaladda H. Beeraha A.D.C.
5. Shirkadda Libsooma.
6. Wakaaladda H. Biyaha.
7. Danwadaagta Beeraleyda.

8. Mashruuca Beeraha degdagga ah.

9. Wakaaladda X. Xoolaha

10. Wakaaladda Muuska Ummadda

11. Wakaaladda Daaqa Qaranka.

12. Wakaaladda Cagaf-Cagafta iyo Q. Beeraha.

Ururkaas waxaa lagu dhisay Shirkii lagu qabtay Wasaaradda Beeraha bishii Abriile 77dii, Shirkaas oo lagu doortay Guddiga Dhexe ee Ururka oo ka kooban 22 xubnood iyo Guddiga fulinta oo ka kooban 5 xubnood.

J) URURKA MAAMULKA IYO ARRIMAHA BULSHADA.

Waxaa ururkaan ku jira shaqaalaha ka shaqeeya Hay'adaha hoos ku qoran:-

1. Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta.
2. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
3. Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.
4. Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.
5. Wasaaradda Caafimaadka.



Sawirkani wuxuu muujinayaa martidii ka soo qayb gashay Shirkii aasaaska xiriirka Guud ee Ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed ee la qabtay bishii Abriille 1977dii, kana yimid ururrada Shaqaalaha aannu saaxiibka nahay.




Waa Ergooyinkii lixda urur shaqaale uga qayb galay Shirweynihii aasaaska.

6. **Wasaaradda Arrimaha Dibedda.**

7. **Wasaaradda Ciyaaraha.**

9. **Jaamacadda Ummadda.**

10. **Wakaaladda Badbaadada Shaqaalaha.**

14. **Guriga Talyaaniga**

11. Laamaha Madaxtooyada J.D.S.

16. Iskaashatooyinka Farmashiyaasha ee Xamar.

13. Wakaaladda Keenidda iyo Soo Saaridda Daawada. (ASBIMA)

14. Dawladda Hoose ee Xamar.

15. Wakaaladda Dalxiiska iyo Hoteelada.

16. Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo horumarinta Reer Miyiga.

17. Iskaashatada Azan..

18. Hoteelka Wadaamo Goy.

Ururka maamulka iyo arrimaha bulshada waxaa lagu dhisay shirkii lagu qabtay Xarunta Wasaaradda Garsoorka iyo Ar. Diinta bishii Abriil 77dii shirkaas oo lagu doortay Guddiga Dhexe ee Ururka oo ka kooban 34 xubnood iyo Guddiga fulinta oo ka kooban 5 xubnood.

## X) URURKA GAADIIDKA ISGAARSIINTA IYO WARFAAFINTA.

Ururkaan waxaa xubno ka ah Shaqaalaha ka shaqeeya Hay'adaha soo socda:-

1 Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka
2 Wasaaradda Warfaafinta iyo H. Dadweynaha.
3 Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.
4 Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekedaha.
5 Wasaaradda Kalluuuka
6 Wakaaladda Ganacsiga Gaadiidka iyo qabka dayactirka.
7 Wakaaladda Dekedaha Soomaaliyeed.
8 Wakaaladda Madbacadda Qaranka.
9 Wakaaladda Gaadiidka Badda.
10 Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta.
11 Wakaaladda Filimada Soomaaliyeed.
12 Golaha Murtida iyo Madadaalada
13 Shirkadda Dayuuradaha Soomaaliyeed.
14 Shirkadda Kalluunka Soomaaliyeed

15 Mashruuca Horumarinta Xeebaha.

16 Shirkadda Shineemooyinka.

17 Hoosada Marasyaano.

Ururka waxaa lagu dhisay shirkii lagu qabtay Madbacadda Qaranka bishii Abriil ee 77dii waxaana lagu doortay shirkaas Guddiga Dhexe ee Ururka oo ka kooban 30 xubnood iyo Guddiga fulinta oo dhan 5 xubnood.

## KH) URURKA GANACSIGA IYO MAALIYADDA

Ururkan waxaa xubno ka ah shaqaalaha ka shaqeeya Hay'adaha soo socda:-

1 Wasaaradda Maaliyadda.

2 Wasaaradda Ganacsiga.

3 Wakaaladda Ganacsiga Ummadda.

4 Rugta Ganacsiga.

5 Wakaaladda Dharka iyo Maacuunka.

6 Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha.

7 Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha.

8 Wakaaladda Batroolka Ummadda.

9 Shirkadda Fiima.

10 Shirkadda Shiis.

11 Shirkadda Caymiska.

12 Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed.

13 Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed.

14 Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed.

Ururka waxaa lagu dhisay shirkii lagu qabtay xarunta Kak. G. Ummadda bishii Abriil ee 77dii waxaana lagu doortay Guddiga Dhexe ee Ururka oo dhan 28 xubnood iyo Guddiga fulinta oo ah 5 xubnood.

## D) URURKA DHISMAHA IYO XOOGGA KORONTADA.

Waxaa ururkan xubno ka ah Shaqaalaha ka shaqeeya hay'adaha hoos ku qoran:

1 Wasaaradda Hawlaha Guud

2 Wakaaladda X.K. Ummadda

3 Wakaaladda Dhismaha Soomaaliyeed

4 Hoggaanka Guud ee Dhismaha X.D.S.

5 Shirkadda Muuri

6 Hoosada Dhexe ee Xalane:



**Sawirani Wuxuu inoo muujinayaa kaalinta ay Shaqaalaha ay ka qaadanayaan kordhinta tacabka, Warshadaha iyo Beeraha.**



7 Mobili Fiicio Missione

8 Shirkadda Imbergiliyo

9 Shirkadda Armis

Ururkaan waxaa lagu dhisay shirkii lagu qabtay xarunta Wakaaladda Xoogga Konrontada Ummadda bishii Arbiile 77dii waxaa lagu doortay Guddiga dhexe ee Ururka oo dhan 18 Xubnood iyo Guddiga fulinta oo ah 5 xubnood.

## II QAABKA DEGAANKA

Dhammaan lix iyo tobanka (16) Gobolka ee uu ka kooban yahay dalka J.D.S. waxa ka dhisan Ururro Shaqaale oo ay xubno ka yihiin shaqaalaha ka shaqeeya gobol kasta degmooyinkiisa, si toos ahana waxay u hoos yimaadaan Ururradaasi Guddiga dhexe ee X.G.SH. iyo Xoghayntiisa Gud. Waxaa dhamman gobolada iyo degmooyinka dalka ka dhisan Guddiyo Shaqaale ee haya xilka hogaaminta Shaqaalaha, Xiriirka Guudna uga wakiil ah gudashada xilkiisa kuna dhaqma Mabda'a Dem. Guddoonka Dhexe ee udub dhexaadka iyo hawlqabadka xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha Soomaaliyeed kana shidaal qaadanaya banaamijka XHKS iyo Go'aanadiisa. Waxaa goobaha shaqada ee degma kasta ka dhisan Guddiyo shaqaale ee fuliya hawl maalmeedka la xiriira arrimaha khuseya shaqada iyo shaqaalaha si toos ahna u hoos yi-

maada ee Ururka Shaqaalaha ee degmada, sidoo kale waxaa tuulooyinka shaqaaluhu ku badan yihiin ka dhisan guddi hoosaadyo la mid ah kuwa goobaha shaqada.

## XILKA IYO WAAJIBAADKA XIRIIRKA GUUD EE SH. S.

Xiriirka Guud ee U.SH.S. isagoo is kordhigayo si buuxdana ula socda isbeddelka kacaaneed ee maanta dunida ka socda, gaar ahaanna dalka Soomaaliya, si fiicanna u dhuuxay waajibaadka taariikhiga ah ee saaran shaqaalaha Soomaaliyeed ee u halgamaya dhismaha Hantiwadaagga Cilmiga ah ayuu shirweynihiisii koowaad ee aasaaska X.G.U.SH.S. ee lagu qabtay magaala madaxda dalka ee Xamar 27-30 Abriile 77dii ku guddoonsaday barnaamij-iyo xeer lagu caddeeyey laguna tifaftiray xilalka iyo waajibaadka deg degga ah iyo kuwa dhaadheer ee la gudboon X.G. inuu guto kuwaas oo aan ku soo koobi karno qodobbadan soo socda :-

1) In X.G.U.SH.S. ku dhex baahiyo shaqaalaha Mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ah iyo Falsafadda Kacaanka 21ka Oktoobar 1969kii.

2) Inuu u halgamo mideynta shaqaalaha meel kawada shaqeeya, kuwa shaqadoodu isku dabeecadda tahay, kuwa urur ku wada jira iyo guud ahaan shaqaalaha Soomaaliyeed ee dalka gudihiisa yio dibeddiisa.

3) Inuu safka hore ka galo ilaalinta Miraha Kacaanka 21ka Oktoobar daafaca Xornimada madaxa bannaanida dalka iyo u dagaallanka midnimada ummadda Soomaaliyeed.

4) Inuu abaabulo habka ugu habboon uguna kharaj yar ee tacabka lagu kordhin karo.

5) Inuu la dagaallamo shaqo la'aanta isagoo shaqaalaha ku guubaabinayo Tacab kordhinta, Xannaanada qalabka iyo ilaalinta hantida dadweynaha.

6) Inuu si buuxda ugu doodo danaha shaqaalaha had iyo jeerna daryeeloodka daafaco sida dhaqaalaha, caafimaadka, xuquuqda xagga fasaxa, nasashada, hoyga, gaadiidka, badbaadada, waxbarashada iwm.

7) Inuu xoojiyo Xiriirka saaxiibtinnimo iyo waxwada qabsi ee ka dhaxeeya shaqaalaha Soomaaliyeed iyo Shaqaalaha weynaha adduunku, gaar ahaan kuwa horusocodka ah ee u halgamaya nabadda Demoqraadiyadda iyo Hantiwadaagga.

Waajibkaas oo inoo caddeynaya halganka Shaqaalaha Soomaaliyeed ugu jiraan hirgelinta Hantiwadaagga Cilmiga ah, iyadoo Bulshada laga hormarinaayo xagga Dhaqaalaha, Siyaasadda iyo Bulshadaba lana xoojinaayo isbahaysiga iyo wax wada qabsiga uu Shaqaalaha Soomaaliyeed la leeyahay xoogagga kale ee horusocodka ah Dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.



**Sawirkani wuxuu muujinayaa Jaalle Sheegow oo jeedinaya taageeridii shaqaalaha Soomaaliyeed ee Go'aannadii Kalfadhigii 3aad ee Golaha Dhexe ee XHKS.**



**Sawirkaan wuxuu muujinayaa kaalinta ay shaqaalaha Soomaaliyeed kaga jiraan Figradda ah iskaa Wax-u-Qabso.**

## SHAQAALAHA SOOMAALIYEED IYO XIRIIRKA DIBEDDA

Xiriirka Guud ee Ururada Shaqaalaha Soomaaliyeed isagoo garwaaqsan qiimaha weyn ee uu leeyahay isbahaysiga Shaqaalaweynaha Adduunku ayuu 12kii bilood ee ina soo dhaaftay ee ka dambeysay Shirweynihii Aasaaska Xiriirka Guud ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu xoog weyn saaray sidii uu u xoojin lahaa xiriirka saaxiibtinnimo ee aynu la leeyahay Ururrada Shaqaalaha ee horusocodka ah ee adduunku gaar ahaan Ururrada Shaqaalaha ee Dalalka aannu saaxiibka nahay wuxuuna qeyb weyn ka qaatay Shirarkii heerka Caalamiga ahaa iyo kuwa qaranba lahaa ee uu k a qeyb galay waxaynuna ka xusi karnaa:

1— Maarso 1978da kalfadhigii labaad ee Golaha dhexe ee Ururka Midnimada Shaqaalaha Afrika (OATUU) ee lagu qabtay Magaalamadaxda Dalka Gaana, waxaa ka qeyb galay Guddoomiyaha Xiriirka Guud Jaalle Maxamed Cali Axmed iyo Jaalle Cabdilaahi Maxamed Mire uGddoomiye kuxigeenka 1aad ee X.G.

2— 13-18ka Febrayo 1978da Shirweynihii aan caadiga ahayn ee Ururada Shaqaalaha, Carbeed (ICATU) ee lagu qabatay Dalka Kuweyd oo ay ka qayb galeen wafdi uu hoggaaminaayo Jaalle Maxamed Cali Axmed Guddoomiyaha Xiriirka G.



**Sawirkaan waa Shirkii Ururrada Shaqaalaha Midnimada Afrika ee lagu qabtay Dalka Gaana 1dii ilaa 3dii Maarso 1978 Waxaana safka hore ka muuqda Guddoomiyaha Xiriirka Guud Jaalle Maxamuud oo Shirkaas ka qayb galay.**



**Sawirkani waa Shirkii Ururrada Shaqaalaha Carbeed (ICATU) oo uu ka qayb galay Jaalle Cabdullaahi M. Mire Guddoomiya Ku xigeenka 1aad ee Xiriirka Gu[illegible] ee Ururrada Shaqaalaha Soomaaliyeed.**

3— 16-23 Abriil shirka Urrurada Shaq. Adduunka (WFTU) ee Baaraag waxaa ka qeyb galay wafdi uu hoggaaminayo Jaalle Cabdullaahi Maxamed Sheekow, Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Xiriirka.

4— Sebteembar 77ka waxaa seminaar aqoon kororsi ah ku tagay Dalka Jarmalka Dimoqraadiga ah qof oo ka mid ah Madaxda Xiriirka ee Ururada Shaqaalaha, Soomaaliyeed waxaana hoggaaminayey Jaalle Cabdulaahi Maxamed Sheegow waxaana ka mid ahaa Guddoomiyayaasha Lixda Urur Shaqaale ee Qaran iyo kuwa Ururrada Gobollada.

5 —Febrayo 1978da Shir aan Caadi ahayn ee Golaha Dhexe ee Ururada Shaqaalaha ee Carabta (ICATU) ee qabtay Magaalada Dimishiq Dalka Suuriya waxaana ka qeyb galay Jaalle Cabdullaahi Maxamed Mire iyo Jaalle Cabdiweli Aadan Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee Xiriirka Guud.

Mudadaas dhexdeeda waxaa heshiisyo saaxiibtinimo iyo wax wada qabsi lala yeeshay Ururrada Shaqaalaha Dalalka Ciraaq iyo Masar.

Shirarka iyo kulamada kale ee laga qayb galay waxaa ka mid ah Shirar qubane ah, madaxd, Xiriirka Guud ka tirsana ay ka qayb gashay shirarkaas ee ka dhacay Tuunis, Benin, Konko, Ciraaq iyo Roomaaniya, dhamaan



**Jaalle Cabdulaahi M. Mire oo la hadlaya Xoghayaha Guud ee Ururka Shaqaalaha Midnimada Afrika. (OATUU) Jaalle OKOOMO.**



**Sawirkani wuxuu inoo muujinayaa wufuuddii ka qayb gashay shirkii ururka Shaqaalaha midnimada Afrika (OATUU) ee Afra.**

shirarkaasna waxaa xiriirka Guud ka soo hooyey guulo dhaxal gal ah.

Dalkeena booqosho hawlEed ku yimid ergooyin ka socda Sanadkaan 1978, waxaa Ururada Shaqaalaha ee Dalka Ciraaq iyo Masar, Xiriirka Guud ee Ururada Shaqaalaha Soomaaliyeed xil weyn ayuu isaga saaray Xoojinta Isbaheysiga iyo wax wada qabsiga uu la leeyahay Ururada Shaqaalaha ee Carabta, Afrika, iyo Adduunweynahaba. Gaar ahaan Ururada horusocodka ah.

## KOR U QAADIDDA GARAADKA SHQAALUHU WAA LAMA HURAAN.

Iyadoo laga duulayo Barnaamijka iyo Xeerka X.G. U.SH.S. waxaa la qaaday tallaabooyin dahxal gal ah ee la xiriira waxbarashada shaqaalaha.

Waxaa Shaqaalaha looga diyaariyey dalka gudihiisa heer qaran, gobol iyo degmaba tababarro, aqoon is weydaarsiyo iyo shirar kala duwan, kuwaasoo looga dan lahaa in kor loogu soo qaado garaadkooda siyaasadeed, dhaqaale iyo bulshaba, laguna kordhiyo awoodooda iyoaqoontooda tacab kordhinta.

Waxaa iyadana guul wayn ah in sanadkii uu dhisnaa Xiriirka guud ee ay suurto gashay in loo dhiso shaqaalaha Soomaaliyeed Dugsi ay ku tababartaan oo heer qarann ah kaasoo furitaankiisa lagu aadiyay 1da Maajo 78da maalinta wayn ee Shaqaalaha adduunka, kuna beegan sanadguuradii 1aad ee X.G.U.SH.S. Dugsigaas oo ah kii ugu horeeyay oo noocaas ah, waxaana loo bixiyay Dugsiga Tababarka Shaqaalaha, wuxuuna ka turjumayaa bilowna u yahay himilada ballaaran ee salka ku haysa in dalka oo dhan laga hirgiliyo dugsiyo noocaas ah, si qof kasta oo Shaqaale ah, uu helo awood waxbarasho isagoo Gobalkiisa ama degmadiisa jooga.



**Waa socdaalkii Wafdigii Shaqaalaha Soomaali-yeed ee aqoon kororsiga ku tagay dalka JDJ.**



Jaalle Cabdullaahi Maxamed Sheegow oo hadiyad Guddoonsiinaya Madax Dugsiga Shaqaalaha ee Dalka JDJ.

UJEEDADA MACHADKA.

Ujeeddooyinka Guud ee loo dhisay Dugsiga Shaqaalaha waxaa ka mid ah:

1) Fidinta aqoonta guud ahaaneed iyo tan xirfadeed ee Shaqaalaha, iyadoo loola jeedo in la abuuro shaqaale aqoonsan ahmiyadda farsamada iyo qiimaha waxbarashada

2) Qorshaynta iyo diyaarinta hawlaha ku saabsan abuuridda kaadir shaqaale.

3) Diyaarinta siyaasada Guud ee Waxbarashada Shaqaalaha, iyadoo la tixgelinayo heerka aqoonee d ee hadab Shaqaaluhu joogo.

4) Horumarinta Tayada Tcab soo saarka shaqaalenimo, iyadoo loola jeedo isticmaalka qalabka waxbarashada ee waaga cusub.

5) Ururinta iyo habaynta tirakoobyada iyo cilmi baarista la xiriirta kor u dhiga aqoonta shaqaale.

XARUNTA MACHAKDA.

Waxay noqonaysaa Xarunta Machaadka Magaala Madaxda J.D.S. hase yeeshee waxaa laga furi doonaa laamo



**Sawirkan wuxuu muujinayaa qaabka soo saarka Dhar-ka ee Warshadda Balcad.**

Gobollada dalka, markay suuragal noqoto.

## MUDDADA WAXBARASHADA.

Waxay u kala baxaan muddada waxbarashada:

1) Waxbarasho gaaban -(2-3 Todobaad)

2) Waxbarasho dheer -(1-3 Bilood)

Tirada dadka waxay u dhexeeyaan 40-50 qof.

Duruusta waxbarashada waxay la xiriirtaa mid guud ahaaneed iyo mid shaqaalenimo, oo ku dheehan baahida weyn ee loo qabo abuuridda-kaadir shaqaale.

## SHURUUDAHA GELITAANKA MACHADKA

1) Xilka xulidda shaqaalaha waxbarashada u imanaya Machadka waxaa iska leh Xiriirka Guud, Ururada & Gudiyada.

2) Waa inay yihiin dad ku sifoobay halgamayn, firfircoonaan shaqaalenimo iyo dadaal.

3) Waa inay leeyihiin aqoon ay kula socon karaan Duruusta laga bixinaayo Dugsiga.

BARAYAASHA MACHADKA

Wuxuu u baahan yahay Machadka, barayaal kala ah:-

1) Dhaqaaliyahanno.

2) Taariikh dhigayaal.

3) Cilmiga Hantiwadaagga.

4) Arimaha Bulshada.

4) Arimaha Shaqada iyo Shaqaalaha.

Waxaa kale oo lagama maarmaan ah in la kaashado.

Barayaasha Machadka Culuunta Siyaasadda,

Xubno Golaha Dhexe XHKS (qaarkood)

Aqoonyahanno dalalka Carbeed iyo kuwa kaleba,

Aqoonyahanno Soomaalyieed,

iyo Xubnaha Xoghaynta Xiriirka Guud U.SH.S.

**Buuggaan Waxaa Lagu**

**Daabacay Wakaaladda**

**Madbacadda Qaranka**

MUQDISHO [illegible]